

**Puntland Non-State  
Actors' Association**



**Dallada Daneeyayaasha aan  
Dawlga Ahayn ee Puntland**

**War –Saxafadeed**

**Date: 29/11/2018**

Dallada Daneeyayaasha an dowlga ahayn ee Puntland (PUNSAA) waxay ugu baaqaysaa Madaxwayanaha Dowlada Puntland Mudane Cabdiweli Maxamed Cali (Gaas).

Qodobada soo socda:

1. In Guddiga Xalinta khilaafadka iyo kala saarista xildhibaanada in uu noqdo mid dhexdhaxaad ah, si cadaalad ahna u dhamayn kara khilaafad ka soo wajihi kara, lehna amaano.
2. Xubnaha gudigu waa in aan lagu darin siyaasiyiinta xilka haya ama kasoo qabtay dowladihii hore, ee waa in laga soo xulaa bulshada qaybaheeda kale, waana in ay ahaadaan dad sharaf, karaamo ku dhex leh shacab ka reer Puntland.
3. Xubnaha Guddiga waa in uu noqdo mid loo dhanyahay oo qoondana laga siiyo Haweenka, si ay u hubiyaan matalaada haweenka ee golaha wakiilada lasoo xulayo.

PUNSAA waxa ay sidoo kale ugu baaqaysaa dhamaan murashaxiinta xilka Madaxwaynaha iyo Madaxweyn Ku-xigeenka in ay ka taxadaraan in ay isticmaalan hadalo xanaf leh, kaas oo wax u dhimmi kara amniga iyo wadajir ka shacabka Puntland.

PUNSAA waxay ugu baaqaysaa Dhamaan Murashaxiinta in ay qayb ka qaataan sugida amniga ayna xadidaan ilaaladooda, taas oo qayb ka qaadan karto in doorashu ku dhacdo jawi nabdoon.

Mahadsanidin.

Gudoomiyaha Bulshada rayid ka ah ee PUNSAA

Faysal Ahmed Warsame

